

**Xukuumadda Soomaaliya Sharciga**

**6 Febraayo 1960 L. 8 diiwaan**

**Wakaalad la siiyey Xukuumadda xagga soo saaridda go'aannada canshuureed**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta (Sharci-dejinta):

**WAXA UU XEERINAYAA UUNA SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1**

Xukuumadda waxaa loo wakiishay in ay, dekreetooyin sharcidejin kusoo saarto, góaannada la xiraa canshuuraha, oo lama huraanka u noqonaya in dib loo helo lacagaha lagama maarmaanka u ah dhismaha Xogga Dalka iyo waxyaabaha kale ku xiran Madaxbannaanida.

**Qod. 2**

Wakaaladda (igmashada) ku xusan qodobka laad waxa ay soconeysaa muddo saddex bilooda, laga bilaabo taariikhda dhaqangalka sharcigan.

**Qod. 3**

Sharciga waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo taariikha lagu nashriyo (faafiyo) Faafinta Rasmiga.

Sharciga waxa uu dhaqagelayaa maalinta sharcigaas lagu faafiyo (nashriyo) Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga, ee sharciyada, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga. Nin kasta oo waajib ka saaran yahay in uu dhowro, inta kalana ku khasba in ay u dhowraan sida sharci ka mida shuruucda Soomaaliya.

Lagu sameeyey Muqdisho, maanta oo ah 6 febraayo 1960.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**